

CODAYNTA IYADOO AAN LAHAYN DEGANAANSHO JOOGTO AH



Codkaagu waa codkaaga - isdiiwaangeli, xog ogaal noqo, codeey!

WAA MAXAY CINWAANKA Codbixintayda?

Dadka aan lahayn deganaansho joogto ah waxay isdiiwaangalin karaan si ay u codeeyaan iyagoo isticmaalaya goobta ay seexdaan sida cinwaankooda. Tani waxay noqon kartaa hoy, goobta saaxiib ama bannaanka. Haddii ay tahay bannaanka, codbixiyuhu waa inuu qoro sharaxaad ku saabsan goobtaas khadka afaraad ee codsiga diiwaangelinta codbixiyaha. Tusaale ahaan, "Geesta waqooyi-galbeed ee Beerta Jefferson agagaarka isgoyska Winston Ave. iyo Smith St."

ISDIIWAANGELI KA HOR MAALINTA

DOORASHADA

Haddii aad isdiiwaangeliso ka hor Maalinta Doorashada adigoo adeegsanaya goob bannaan sida deganaanshahaaga, diiwaankaaga codbixiyaha waxaa lagu calaamadin doonaa 'la murmay' sababtoo ah degmadu ma xaqijin karin cinwaan waddo gaar ah. Weli waxaad awoodi doontaa inaad codeyso, laakiin goobta codbixinta Maalinta Doorashada waxaa lagaa codsan doonaa inaad ku dhaarto dhaarta inaad ku nooshahay goobtaas. Si loo hubiyo in diiwaangelintaada ay firfircoor tahay ilaa Maalinta Doorashada, waxaa ugu wanaagsan in la isdiiwaangeliyo laba bilood gudahood taariikhdaas.

TAARIKHAHA 2025

DOORASHADA

AASAASIGA

Talaada, 12ka Bisha 8aad
(August)

MAQNAANSHO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 19ka Bisha 9aad (September) ilaa 3da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Hory isdiiwaangeli ugu dambayn 14ka Bisha 10aad (October) si aad waqtii u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA

Talaada, 4da Bisha 11aad
(November)

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE

CODAYNTA IYADOO AAN LAHAYN DEGANAANSHO JOOGTO AH



...ka timid horay

ISDIIWAANGELI MAALINTA DOORASHADA

Sidoo kale waxaad iska diiwaangelin kartaa Maalinta Doorashada. Wuxuu aad u baahan doontaa inaad tusiso caddeyn deganaansho.

CADDEYNTA DEGANAANSHAHAA

*Si aad isaga diiwaangeliso goobtaada codbixinta
Maalinta Doorashada, keena mid ka mid ah caddeymaha
deganaanshaha ee hoos ku taxan:*

1. *Aqoonsi leh magacaaga iyo cinwaankaaga hadda*
2. *Aqoonsi sawir leh iyo dokumenti leh magacaaga iyo cinwaankaaga hadda*
3. *Cod-bixiye diiwaangashan oo xaqiijin kara cinwaankaaga*
4. *Aqoonsiga ardayga jaamacadda oo leh liiska guryaha*
5. *Diiwaangelin sax ah oo xaafad isku mid ah*
6. *Ogeysiiska Diiwaangelinta Daahsoon*
7. *Shaqaalaha goobta degaanka*

Haddii aad dibadda ku nooshahay, guri ku meel gaar ah, ama aad joogto guriga saaxiib, waxaa laga yaabaa inaadan haysan wax dukumiintiyo caddeynaya inaad halkaas ku nooshahay. Haddii ay sidaas tahay, cod-bixiye diiwaangashan oo xaafaddaada ka tirsan ayaa kula socon kara goobta codbixinta si uu u saxiixo dhaarta xaqiijinaysa halka aad ku nooshahay.

Haddii aad ku nooshahay hoy, shaqaale ka tirsan hoyga ayaa kula socon kara goobta codbixinta si uu u xaqijiyo inaad hoyga ku nooshahay.



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE